# Adeegyada Joojinta ee Loo Siman Yahay

Bayaanka Booska

**Si loogu taageero dhammaan bulshooyinkasi loo siman yahay oona loo wanaajiyo caafimaadka, Gobolka Washington waa inuu maalgeliyaa xeeladaha caddaynta ku salaysan heer si loo xaqiijiyo in adeegyada joojinta ay yihiin kuwo:**

## Ay Marin U Heli Karaan Dhammaan Kuwa Doonaya Daawaynta

Diyaar u ah qof kasta oo raadinaya caawimada ku aadan ku-tiirsanaanta nikotiinka iyadoon loo eegayn jinsigooda, qowmiyaddooda, aqoonsiga jinsigooda, asalka dhaqameedkooda, da'dooda, ama marin u helkooda daboolista caymis.

Lagu bixiyo lacag la'aan ama qiime aad u jaban oo la siiyo shakhsiyaadka aan caymiska lahayn ama kuwa sida hoose loo ceymiyay, iyada oo la mid ah helitaanka dhammaan daawaynta caddaynta ku salaysan ee ay heli karaan kuwa leh caymiska gaarka ah.

Lagu daray baaritaanka uu qofku udub dhexaadka u yahay ee ku aadan ku-tiirsanaanta nikotiinta ee daryeelka caafimaadka, caafimaadka hab-dhaqanka, iyo bixiyayaasha caafimaadka bulshada, gaar ahaan kuwa u adeega bulshooyinka leh heerarka isticmaalka tubaakada ganacsiga ee sareeya.

U bandhig shakhsiyaadka habka joojinta ee caddaynta ku salaysan, ama isku dhafka hababka, ay ku qanacsan yihiin iney isticmaalan.

Ku habboon in la isticmaalo, iyada oo la tixgalinayo goobaha adeegga, gaadiid-raaca la heli karo, baahida ku helida macluumaadka qaabab kala duwan, iyo caqabadaha tignoolajiyadeed.

## Si Ku Filan Loo Maalgeliyay

Si joogta ah loo maalgeliyo si loo taageero adeegyada la heli karo, ololayaasha xayeeysiineed, heerarka shaqaaleysiinta ee daboolaya baahida, tababarka shaqaalaha ee socda, isticmaalka tignoolajiyada cusub sida adeegyada joojinta ku salaysan websaydka, iyo qiimaynta.

Heerarka maalgelinta oo filan si loo bixiyo:
- Daawooyinka joojinta iyo helitaanka adeegyada taageerada la-talinta muddada lagama maarmaanka ah ee daaweynta,
- Tababarka Khabiirada Joojinta Tubaakada ee Shahaadaysan,
- Marin u helka awooda leh ee ku aadan Faragelinada joojinta tubaakada ee wax ku oolka ah, iyo
- Adeegyada kale ee joojinta ee qaabka beddelka ah (tusaale ahaan, fool-ka-fool ahaan, fogaan arag ahan, isku-dhaf).

## Si Hufan Loo Xayeeysiiyay

Ka faa'iidayso fariimaha xayaysiinta iyo kuwa taageerada leh kana fogow sawirada muujinaya isticmaalka badeecooyinka nikotiinta uu ku jiro ama sawirada ceebeeya dadka isticmaala tubaakada ganacsiga.

Ku dabakh xeeladaha dhaqan ahaanta habboon ee loogu talagalay in lagu gaadho bulshooyinka leh heerarka isticmaalka tubaakada ganacsi ee ugu sarreeya.

## Ka jawaabaya Baahiyaha Shaqsiga iyo Bulshadaba

Loogu talagalay inuu af ahaan iyo dhaqan ahaanba ku habboon yahay shakhsiyaadka iyo bulshooyinka ay u adeegayaan.

Ku dar ahmiyad gaar ah u adeegidda:
- Shakhsiyaadka ka soo jeeda bulshooyinka leh heerarka sare ee isticmaalka tubaakada ganacsiga kuwaas oo sidoo kale inta badan si aan toos ahayn loogu bartilmaameedsado iibinta iyo suuqgeynta warshadaha tubaakada,
- Shakhsiyaadka sidoo kale la kulmaya caqabadaha caafimaadka hab-dhaqaneed,
- Dhalinyarada iyo qaangaarada yaryar, iyo
- Shakhsiyaadka ugu jira halista ugu badan ee ku aadan saamaynta caafimaadka.

U bandhig marin u helka Khabiirada Daawaynta Tubaakada ee Shahaadaysan kuwaas oo ka kala yimid bulshooyinka ay u adeegaan.

La qabsan karo si uu wax uuga qabto muuqaalka marba markii ka sii danbeysa isasii beddelaaya ee badeecadaha tubaakada ganacsiga ah iyo baahida gaarka ah ee joojinta shakhsiyaadka iyadoo lagu saleynayo badeecada ama alaabada ay isticmaalaan iyo heerka ku tiirsanaanta nikotiinta, sida dadka isticmaala waxyaabaha menthol ee inta badan leh ku tiirsanaanta kororsan ee ku aadan nikotiinta.

Waxaa lagu wargeliyay oona si joogto ah loogu wanaajiyaa iyadoo loo maraayo talooyinka xubnaha bulshada iyo ururada matala ama la shaqeeya bulshooyinka leh heerarka isticmaalka tubaakada ganacsiga ugu sarreeya oo ay ku jiraan LGBTQ+, Afrikaanta-Mareykanka/Madowga, Hisbaanik, Latin-ka, Aasiyaanka Mareykanka, Dhaladka Hawaii, Kasoo jeedayaasha Jasiiradda Baasifigga, Dhaladka Alaskan /Hindida Maraykanka, halyeeyada, dadka reer miyiga ah, dadka soogalootiga ah, iyo shakhsiyaadka uurka leh.

Talooyinka bulshada waa in lagu soo ururiyaa iyadoo la adeegsanayo farsamooyin jawaab celin tayo iyo tiro leh, oo ay ku jiraan kooxaha diirada la saarayo, kuwaas oo bixiya wax dhiirigelin ah oo ku aadan ka qaybgalka bulshada.

## MAXAA LOOGU WACAYAA TUBAAKADA GANACSIGA?

*** "Tubaakada ganacsiga"**
waxaa si ula kac ah ugu loo isticmaalo si ay ugu kala saaran isticmaalka tubaakada dhaqameedka qaar ka mid ah dadka asaliga ah iyo qabiilooyinka Hindida Maraykanka.

Tubaakada ganacsigu waa tubaakada ay soo saarto oo ayna iibiso warshadaha tubaakada ganacsiga, waxayna la xiriirtaa natiijooyinka caafimaad xumo sida qabatin, cudur, iyo dhimasho. Tubaakada ganacsigu waxaa ka mid ah badeeco kasta oo ay ku jiraan tubaako iyo/ama nikotiinka, sida sigaarka, qoriga tubaakada laga cabo, sigaarka elektarooniga ah, hookaha, tuubooyinka, tubaakada la kulayliyay, tubaakada aan qiiqa lahayn, iyo badeecooyinka kale ee nikotiinta ah ee afka laga qaato. Tubaakada ganacsigu kuma jirto dawooyinka beddelka nikotiinka ee Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka (Food and Drug Administration, FDA) uu ansixiyay sida balastarka ama xanjada nikotiinka.

## MACNAHA GUUD & TIXRAACA

Isticmaalka tubaakada ganacsiga ayaa wali ah sababta hogaamineysa dhimashada iyo cudurrada laga hortegi karo ee Gobolka Washington, oo ku leh saamayn aan loo simanayn dadka midabka leh, Dhaladka Maraykanka, bulshooyinka LGBTQ+, iyo dadka qaba xaaladaha caafimaadka habdhaqaneed.

Jiilalka cusub ee dhalinyarada iyo dadka waaweyn ayaa hadda la qabatimay nikotiinka sababtoo ah hababka suuqgeyn xooga leh ee warshadaha tubaakada ee ku aadan sigaarka elektarooniga ah ee dhadhanka leh ee ay wadeen in ka badan shan iyo toban sano.

Inta badan dadka isticmaala waxyaabaha nikotiinta ah waxay rabaan inay joojiyaan. Qiyaastii 70% dadka waaweyn ee sigaarka cabba iyo saddex-meelood laba meel dhalinyarada isticmaala waxay sheegeen inay rabaan inay joojiyaan isticmaalka tubaakada ganacsiga. (Joojinta Sigaar-cabida ee CDC: bogga Xaqiiqooyinka Ugu Horeeyaan)

Caqabadda muhiimka ah ee ku aadan joojinta nikotiinka ee gobolkeena waa la'aanta helitaanka adeegyada iyo illaha/agabyada joojinta ee dhaqan ahaanta habboon, caddaynna ku saleysan. Khadka Joojinta ee Gobolka Washington, abka 2Morrow Health, iyo aaladaha kale ee joojinta ee lagu bixiyo iyadoo loo maraayo Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington waa adeegyo muhiim ah, laakiin ma bixiyaan hab dhammaystiran oo la qabsan kara baahiyaha dhammaan dadka Washington.

Sannado badan, Gobolka Washington wuxuu ka helay darajada F falanqaynta sannadlaha ah ee Ururka Sambabada Maraykanka taasoo ku aadaneed marin u helka guud ee adeegyada joojinta iyo heerka maalgelinta gobolka ee ka hortagga iyo joojinta tubaakada ganacsiga. Laga soo bilaabo 2010 illaa 2022, Khadka Joojinta iyo adeegyada kale ee joojinta gobolku waxaa gebi ahaanba maalgelisay Xarumaha Kontoroolida iyo Kahortagga Cuduradda (Centers for Disease Control and Prevention, CDC).

Qoondeeynadii dhawaan ee uu gobolku ku bixiyay barnaamijka ka-hortagga tubaakada ganacsiga waa bilow ku aadan xagga dib u dhiska barnaamijka, iyadoo $2.5 milyan oo cusub loogu deeqay dhammaan hawlaha barnaamijka gudaha Sannad Xisaabeedka 2024. Markii Washington ay bixisay barnaamij tubaakada ganacsiga ah oo dhameystiran horraantii 2000-meeyadii, adeegyada joojinta oo keliya waxaa lagu maalgeliyay $1.2 milyan sannadkii (Sannad Xisaabeedka 2001). Taageerada gobolku hadda aad buu uga hoos dhacayaa maalgalinada lagu taliyay oo ah $29.33 milyan sanadkiiba (ama $3.73 qofkiiba) ee loogu talagalay faragelinada joojinta.

**Washington Breathes** waa isbahaysi gobolka oo dhan ka jira wuxuuna ka kooban yahay ururo iyo shakhsiyaad ka shaqeenaya sidii loo tirtiri lahaa isticmaalka waxyeelada leh ee tubaakada ganacsiga iyo bedeecooyinka kale ee nikotiinka.

Bayaankan waxaa soo saaray Kooxda-shaqada ee isbahaysiga ee Wanaajinta Daaweynta Joojinta waxaana ansixiyeen Guddiga Hagida.

**washingtonbreathes.org**